



WARQADDA TALO SIINTA QOYSKA

Akhriska qoysku waa muhiim da' kasta. Carruurta iyo dhallintu waxay ku xirnaan karaan qoyskooda marka ay wax isla akhriyaan. Bilowga dugsiga hoose, wax wada akhrinta ayaa si gaar muhiim u ah.

Carruurta waxay noqdaan kuwa aad uga warqaba adduunkooda. Waxay sidoo kale bartaan sida xarfaha iyo ereyada ay u shaqeeyaan. Qoysasku waxay caawin karaan carruurtooda marka ay baranayaan akhriska. Hoos waxaa ku yaalla talooyin dhowr ah oo aad adeegsan karto marka aad akhrinayso buugaagta ku jira maktabaddaada Akhristayaasha Koraaya ee Louisville.

- Akhriso badanaa. Isku dhawaada oo ka dhiga akhriska waayo aragnimo wanaagsan. Ilmahaaga wuxuu fariisan karaa dhabtaada ama agtaada si ay u arkaan sawirada. Carruurta waxay jeelaan doonaan in ay waqtii kula qaataan.
- Maktabaddaada Akhristayaasha Koraaya waxay leedahay buugaag yar sabab ayaana ka dambeysa arrintaasi. Buugaaga cabbir ahaan waxaa loogu talagalay gacmo yar yar! Ku dhiirigeli ilmahaaga in uu qabto buugga uuna rogrogro bogagga marka aad wada akhrisanaysaan.
- Buugaaga badan oo yaalla maktabaddaada waxay kaliya ku leeyihii ereyo yar bog kasta. U adeegso ereyada in aad ka caawiso ilmahaaga in uu fahmo sida buugaaga ay u shaqeeyaan. Kala hadal jihada ereyada: laga billaabo bidix ilaa midig iyo kor ilaa hoos. Farta ku tilmaam meelaha bannaan ee u dhexeeyaa ereyada.
- Wada hadallada ku saabsan buugaagta waxay dhisaan xirfadaha luuqadda carruurta. Waqtii qabso aad kala sheekaysato ilmahaaga waxa aad akhrinayso. Qaabee adeegsiga ereyada cusub. Ku hadal jumlado dhameystiran. Ku dhiirigali ilmahaaga in uu hadlo, hadlo, hadlo.
- U oggolow ilmahaaga in uu ku weydiyo su'aalo ku saabsan buugga. Waxaad sidoo kale weydiin kartaa su'aalo si aad ugu dhiirigaliso ilmahaaga in uu adeegsado ereyo badan. Adeegso fikrardo furan maadaama ilmaha uu ku jawaabi Karin hal erey ama labo. Isku day:
 - Wax iiga sheeg...
 - Maxaad u maleyneysaa...?
 - Wax badan iiga sheeg.
- Carruur badan ayaa arki doona buugaag ay ka helaan maktabaddooda Akhistayaasha Koraaya. Waxay jeelaan doonaan in ay akhriyaan marar badan. Taasi waa arrin wanaagsan! Akhrinta isla buuggii marar badan waxay dhisi kartaa xirfadaha akhris-qorista carruurta.
- Isku day in aad waqtii u dejiso maalin kasta oo adiga iyo ilmahaaga aad ku wada qaadan kartaan akhriska. Tani waxay u oggolaaneysaa in ay ogaadaan in akhriska uu muhiim yahay. Ilmahaaga wuxuu sugi karaa howshan gaarka ah maalin kasta.
- Ha ka walwalin in aad u dhawaaqdo si nacasnimo ah ama aad ku celceliso marka aad wax la akhrinayso ilmahaaga. Iyaga dhankooda, waxay u tahay madadaalo iyo waqtii wanaagsan in aad wada qaadanaysaan!

